Soo dhawaada deggenaysaasha cusubow

OHIO BMV
BUREAU OF MOTOR VEHICLES

Waakan sida aad ku heli lahayd Liisanka Waditaanka Ohio, Lahaanshaha Baabuurka iyo LiisankaTaargada

Haddii aad ku cusub tahay Ohio, wax laga yaabaa inaadan ka fakarin wali, laakiinse waxaad u baahan doontaa liisan cusub oo waditaan, taargo cusub iyo dukumentiga lahaansho baabuurkaaga.

Markaad noqoto qof deggane ah, waxaad u baahan tahay inaad noqoto wade baabuur reer Ohio ah sida ugu dhakhsaha badan.

Adiga waxa lagu qaadan doona deggane Ohio markaad:

- **Shaqo qabato**
- **Saxiixdo kiro**
- **Guri iibsato**
- **Aad isku-diiwangaliso doorashada**
- **Carruurta aad qoro dugsiga**

Sida loo Helo Liisan Waditaan

Marka hore waxaad u baahan tahay inaad hesho Buugga Sharciga Waditaanka Baabuurrta (Digest of Ohio Motor Vehicle Laws). Buug-yarahan ayaad ka heli kartaa Xafiiska Waaxda Ammaanka Dadweynaha adgia oo u wacaya (614) 466-4344 ama hay'adaha liisanka waditaaan oo ku ytaal agagaaraha. Ka eeg barta internetka ee ku taal www.ohiobmv.com si aad u hesho Diiwaangaliye ku-Xigaha adiga kugu dhow.

Waxa kasta oo aad uga baahan tahay inaad u diyaar-garowdo imtixaanaka liisanka waditaanka waxa u ku yaal Buugga Sharciga Waditaanka Baabuurrta.

Markaad akhrisato waxyaabahaas, adigu diyaar ayaad u tahay inaad qaadato imtixaanka. Aad Rugta Imtixaanka Waardiga Waddo-Weynta Gobolka Ohio midkuu doono ha noqdee si aad u qaadato imtixaan qoran iyo baaritaan indho. Liiska goobuhu waxay ku yaalliin dhabarka buugga. Looma baahna ballan, laakiin iska hubi maalmaha iyo saacadaha ruggta kuugu dhowi furan yihiin.

Imtixaanka waditaanka waa laga dhaafaa badiyaa dadka deggenaansha ku cusub oo leh liisan ka-baxsan-gobolka oo sharci ah. Imtaxaan-qaadaha ayaa laga yaabaa in u baahdo in la imtixaano qofka looga baahan yahay xiddiditaan liisan.

Dadka Deggenayaasha Cusub ah ee ka Yar 18 Jir

Ka hor intaadan liisan ku yeelan Ohio, waa inaad keentaa caddayn ah lix bilood oo horay waditaan baabuur ah. Waa inaad buuxisaa dhaar qoraal ah sheegeysa 50 saacadood oo waiditaan ah, oo 10 ka mid aahi yihiin habeenkii. Waa inaad waliba tustaa caddayn qancineysa shuruudaha Waxbarashada Wadaha Ohio.

Waxa intaa u dheer, waa inaad haystaa qof kula saxeexa (waalid ama mas'uul sharci ah) oo aad keentaa caddayn waditaan dhammays-tiran oo ah koorso waxbarasho waditaanka ah oo la kulmaya ama badan waxyaabaha Ohio u baahan tahay. Si aad u ogaato haddii waxbarashadaada koorsada waditaanku tahay inay tahy mid u qalanta heerka loo baahan yahay, booqo Rugta Imtixaanka Waddo-Weynta Waardiga Gobolka Ohio adiga oo sita liisankaaga waditaanka ee hadda jira iyo shahaadado orijinaal ah oo aad ku dhammaystay waxbarasho waditaan.

Haddii la ogaado in tababbarka waditaanka aad adigu dhammaysey u la kulmayo waxyaabaha Ohio u baahan tahay, adiga waa laguu oggolaan inaad dhammeysato imtixaan u qaadashada liisankaaga. Dokumentiyadaada orijinaalka ah waa laguu soo celin.

Waa in ad tagta xafiska imtixaanka laga qado markaad si guul leh aad u dhammeys-tirato imtixaanka, ayaa imtixaan qaaduhu ku siin doonaa foomka "imtixaanka waa laga gudbay". Toban maalmood gudahood, foomkan u gee hay'adda liisan ee kuugu dhow (mararka qaarkood ku yaal isla dhismaha rugta imtixaanka). Adiga oo wata liisanka wadaha ee gobolka ka baxsan iyo caddaynta deggenaashaha Ohio iyo caddayn ah joogitaanka Mareykanka oo sharci ah. Dukumentiyada la aqbali karo waxa laga arki karaa bartayada shabakaadda ku taal ee www.OhioBMV.com. Shaqaalaha hay'adda liisanka ayaa kaa codsan inaad iska dhiibto liisankaaga ka-baxsan-gobalka, oo waxay ku siinayaan liisanka waditaanka Ohio, badina qiimaheedu tahay $24.

Haddii aad tahay qof waditaankeedu markii ugu horreesey ay u tahay ama liisankaagii hore u dhacay, waa inaad ka iibsataa boqshad fasax ku-meel-gaar ah hay'adda liisanka. Caddayn ah lambarka Soshal Sekuuritiga iyo warqadda dhalashada oo sharciyeysan ayaa looga baahan yahay boqshaddan.

Waraaqda Lahaashaha Diiwaan-galinta Iyo Liisan taargo

Haddii aad leeadahay baabuur (iwm.), waxaad u baahan tahay in la baaro. Ujeeddadu waa inaad ka fogaato diiwaan-galinta baabuurta la so xaday. Baabuur ayaa lagu baari karaa dhammaan hay'adaha liisanka, Xafiisyada Karaaniga Maxkamada Kaawntiga (County Clerk of Courts offices) qaarkood, iyo waliba meelo badan oo baaburta lagu iibiyo. Haddii aad u tageyso meel baabuurta lagu iibiyo oo Ohio ku taal, fadalan horay ugu garaac oo weydii waaxda adeegga.

Baaritaanka baabuurkaaga ayaa xaqiijin doonta nooca iyo moodeelka, nooca qalfoofka iyo lambarka taxanaha ee warshadda ama lambarka aqoonsiga baabuurka. Waxa lagu siin doonaa foomaka baaritaanka la buuxiyey.

Tani waxay qaadan doona shan daqiiqo. Waxa jira $3.50 ujro oo laga qaato goobta baabuurta lagu iibiyo ama hay'adda liisanka iyo $1.50 ujro ah oo laga ururiyo joogisga ku xiga, oo ah xafiiska lahaanshaha baabuurta.

Marka ku xigta, raac liiskan wax-hubinta ah:

✓ Aad Xafiiska kasta oo ah ka Karaaniga Maxkamadaha Kaawntiga, markaana xafiiska lahaansha baabuurta. Soo hel meesha ay ku taal qybta kaawatiga dawladda ee buugga taleefankaaga oo ah hoosteeda "Karaaniga Maxkamadaha, Waaxda Lahaanshaha Baabuurta," ama booqo visit www.ohiobmv.com hoosteena eeg Goobaha Laamaha Xafiiska, xafiisyada Lahaanshaha.

- ✓ Haddii baabuurku (iwm.) u leeyahay laba qof oo wadaaga lahaanshaha, labadiinuba waa inaad hawsha qabataan, haddii aad hesho awood u hantiile uu siiyay wakiilasho sharci ah oo ah qofka aan iman karin.
- ✓ Haddii deyn lagu leeyahay baabuurkaaga, waa inaad weydiisataa in lahaanshahaagi baabuur ee hore loogu diro si toos ah xafiiska lahaanshaha si deynta loo diiwaan galiyo lahaanshaha Ohio.
- ✓ Waxaad u baahan tahay inaad wacdo Karaaniga Maxkamadaha si aad u ogaato qiimaha beddelka lahaanshaha. Haddii cashuurta iibista lagu leeyahay, waa lagaa qaadi doonaa inta lahaanshaha cusub lagu siinin. Wareejinta beddelka lahaanshaha waa in lagu bixiyaa lacag kaash ah.
- ✓ Haddii aad u kireysato babuur muddo dheer (lease), la xiriir ha'adda kireysa si aad u ogaato sidii aad wax uga qaban lahayd kala wareejiska lahaanshaha. Kambaniyadu wey ku kala duwan yihiin hawshaas.
- ✓ Markaa haddaba waxaad tageysaa ha'adda liisanka si aad u hesho taargadaada cusub. Si aad u diiwaan galiso baabuurkaaga Ohio gudaheeda, waa inaad dhiibtaa lahaanshahaaga Ohio ee cusub (ama wareegto lahaansho haddii u baabuurkaaga lagu leeyahay deyn) iyo cadday ah lambarka Sooshaal Sekuuritiga.

  Hay'adda liisanka ayaa lacagaha diiwaan galinta ku habboon qaadi iyada oo ay ku xiran tahay markaa iibsaneyso taarigada, goobta degmada aad ku nooshahay cashuurteeda iya taariikhda dhalashadaada. Baabuurta la raaco iyo taragyadaa aan lagu ganacsan, qiimuhu waxay isku kala jiraan $35 illaa $105. Ma kale, sida lahaanshaha oo kale, dhammaan sida sharciga u leh baabuurku waa inay wada codsadaan.

Waxa halkan ku liis gareysan sharciyada baabuurta Ohio ee laga yaabaa inay ka duwan yihiin gobollada kale sharciyadooda.

Suunka B abadbaadada

Isticmaalka suunka badbaadada ee ka ah Ohio waajibaad sharci ayaa sharcigu uga baahan yahay wadyaasha iyo dadka kursiga hore fadhiya badiyaa baabuurta dadka qaada ah inay xirtaan suunka badbaadada marka kasta oo ay wadaan ama ay raacayaan baabuur (ama wax la midka ah) gudaha waddooyinka Ohio. Haddii aad tahay wade ka yar da'da 18 jirka, dhamman dadka baabuurka ku jira, kursiga hore iyo kuwa dambeba, waa inay xirtaan suunka badbaadada marka aad ku wadeyso baabuur waddooyinka Ohio.

Sharcigu wax u dhaafayaa u-hoggaansiga:

1. Carruurta u horay loogu daray sharciga xakamaynta badbaadada ilmaha.
2. Dadka ku shaqeynaya baabuurta addegga boostada iyo jaraa'idka una geynaya guriga.
3. Dadka sita waraaq sharciyeysan dhakhtarkooda oo qeexaysa xaaladaha caafimaad ee u diidaya isticmaalka suunka badbaadada.
4. Dadka ku jira baabuurta la sameeyey ka hor 1966. Dadka ku jira baabuurta ku qalabeysan bacaha-hawada (airbags) lagama dhaafayo sharciga xirnaanta suunka badbaadada.

Ku xadgudubka sharciga suunka badbaadadu ma aha xadgudub dhaqaaqitaanka oo ma yeelanayaan buundooyin lagu qorayo diwaanka daa'imka ah ee waditaanka.

Sharciqa Xakamaynta Ilmaha

Ilma kasta oo kar da'da afarta sannadood ama miisaanku ka yar yahay 40 rodal ayaa loo baahan yahay inay isticmaalaan xakamaynta badbaadada ilmaha oo la kulmaya heerka u ka filayo xeerka federaalak ee babuurta.

Sharciga Ohio ayaa u baahan in carruurta da'da 4-8 ee lagu wado baabuur iyo waxa la midka ah si fiican loogu xakameeyo kursiga ku-qaadka baabuurka imaha dhaladka ah. Sharciga Ohio ayaa u baahan in carruurta da'da 4-15 ee lagu wado baabuur iyo waxa la midka ah si fiican loogu xakameeyo nidaamka xakamaynta ilmaha ama suunka kursiga.

Midabeynta Daaqadda

Boqolleyda gudbinta ileyska ee laga aqbali karo baaburtu wa sida socota: Muraayadda hore, midabayntu waa inay oggolaataa gudbin ileys oo 70 boqolkiiba-boqol; daaqadaha bidix iyo midig ka xiga wadaha, midabayntu waa inay u u ogglaadaan gudbin ileys oo 50 boqolkiiba-boqol, lagu daro ama laga jaro saddex boqolkiiba-boqol.

Isticmaalka Makarafoonnada-Dhagaha

Isticmaalka makarafoonnada-dhagaha marka baabuurka iyo wixii la amid ah la wado sharci ahaan waa mannuuc, laga reebo marka dadka mootada wataa ay u isticmaalyaan ujeeddooyinka isgaarsiinta.

Muujinta Liisanka Taargada

Laba taargo liisan yaa laga rabaa dhammaan baabuurta, taraagyada iyo baabuurta madd-aalada (RV).

Diiwaan-Galinta

Taargooyinka liisanka ayaa dhaca maalinta dhalashada ee qofka baabuurka leh, ama haddii u kireysan yahay muddo dheer, diwaan-galinta ayaa dhacaysa bisha ay ugu talagashay shirkadda kireysey 20keeda. Muddo lagaa qalleynnaa ama jiro. Diiwaan-galinta yaa dib loo cusbooneysiisan karaa iyada oo la aadayo hay'ad diiwaan-galiye liisan ku-xigeen ah, boostada ku diiwaan-galinteeda, adiga oo taga barta www.OPLATES.com ama adiga oo u waca lambarka lacag-la'aanta ah ee 1-866-OPLATES (1-866-675-2837). Ciwaannada ayaa lagu cusbooneysiisan karaa iyada lagu buuxinayo foomka hay'ad diiwaan-galiye liisan ku-xigeen ah ama iyada oo la galayo barta www.OPLATES.com.

Liisanka Wakhtiga-u-Horreeya

(Aan lahayn liisan hore)

Aqoonta, aragtida, iyo imtixaannada xirfadaha ayaa looga baahan yahay liisanka ugu wakhtiga-ugu-horreeya.

Ma-Deggenayaasha

Madeggene Gobol ayaa ku wadi baabuur isaga ama iyada oon lahayn Diiwaan-galinta Ohio illaa inta gobolka ama dalka ay ka yimaaddeen ay iyaguna bixiyaan iswaeydaarsi u mudnnaantaas oo kale.

Howl-wadeennada ciidamada ee ah madeggenayaasha ayaa isticmaali kara gobolka hoyga u ah liisankooda waditaan. Xubnaha qoysku waa inay helaan liisan Ohio.

Si aad u hesho liisanka wadaha ee Ohioama aqoonsiga, waa inaad caddeysaa jidkaagaaad deggentahay Ohio oo ay la socotoaqoonsiyada kale. Fadlan booqo bartayada shabakadda ee ku taal www.OhioBMV.com.

Liisanka Baaskiilka Motorka leh

Liisanka baaskiilka motorka leh ayaa la siin doonaa qof kasta 14 jir ah iyo kuwii ka weyn ee ka gudba aragga laga rabo iyo imtixaannada qoran iyo kuwa xirfadaha.

Liisanka Waditaanka

Liisannada waditaanka mid ahaanteed waxay sharciyeysan tahay afar sano oo waxa ay dhici doontaa taariikhda dhalashadaada. Muddo lagaa qalleynyaa ma jirto. Liisannda Waditaanka Ganacsigu ayaa looga baahan yahay wadayaasha baabuurta, taragyada iwm ee lagu ganacsado.

Cabbitaannada Aalkolada ah

Weel furan oo cabbitaan khamri ah oo ku jira baabuur ayaa mannuucan.

Raadaarka

Sharciga gobolka ayaan u baahneyn ku haagaajin sharci fulinta raadaarka. Raadaarka wax-sheegg ah in la haysto sharciga kama baxsana lagu laguguma waaninayo.

Shaagagga Birta leh

Shaagagga birta leh waxay fasax yihiin laga bilaabo Noofember 1 illaa Abrii 15.

Sharciga Xammulka Bannaan

Raacitaanka tarak xaggiisa dambe oo leh meel furan oo wax lagu qaado ama daba-jiid ku socoda waxa ka badan 25 mayl saacaddii kasta ayaa sharci-darro ah markay raacaan dadka ka yar 16 jirka.

Dibad Seexad

Dibad sexdka meelaha lagu nasto waddoyinka ayaa mamnnuucan.

BAC

Dhammaan wadayaasha lagu lagu qaado dambiga ku maan-doorsan duroogo ama khamri haddii barxanaanta alkoholada ku jirta dhiigoodu (BAC) u yahay .08 boqolkiiba boqol ama wax ka badan. Wadayaasha ka yar da'da 21 oo leh heer BAC oo ah .02 boqolkiiba boqol ama wax ka badan laakiin ka yar .08 boqolkiiba boqol ayaa gaanaax dambi ku qaad loo yaqaan waditaan Baabuur Khamri-Cabka Da'da Yar (OVUAC) ayaa lagu qaadi doonaa. Wadayaasha Ganacsiga ayaa lagu qaadi dambiga OVI oo heerka BAC ee .04 ama wixii ka badan.

Koofiyadda Mootada

Koofiyadda mootada ayaa lagu talinayaa laakiin sharcigu u baahneyn laga reebo marka laga hooseeyo da'da 18 jirka, ama dadka liisanka mootada lahaa ama ayidaad lagu siiyey wax ka yar hal sano. Okiyaalaha ama muraayadaha ka ilaalinta ama dabeyl ka ilaalinta yaa loo baahan yahay.

Mootooyinka

Waditaanka mootada liisan sharciyeysan la'aanteed, fasax ayideeysan ama ku meel gaar ahi waa sharci darro. In liisan la siiyo, 16 jir iyo 17 jirka ayaa ah inay tusaan caddayn inay dhammayteen koorso waxbarasho waditaan iyo koorso waxbarasho oo badbaadada mootada ka hor inteyna u qalmin ka qaadashada imtixaanka mootada rugta imtixaanka waditaanka. Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah, u wac 1-800-83-RIDER.

Shahaado Lahaansho Baabuur

Waxa loo bahan Shahaado lahaansho Ohio ah si loo diwaan-galiyo dhammaan baabuurta laga reebo ooyinka yaryar (mopeds).

Goobaha Baabuurta la Dhigto ee Dadka Lexaadka Wax ka Qaba

Dadka naafonimada leh yaa heli karataargooyin liisan ama calaamada daaqadda ladhigo oo calaamad dusha ku leh oo u oggolaaneysa baabuur dhagasho meelaha dadka naafoda ah ah ama lexaadka wax-ka-qaba. Arjiyada ayaa laga heli karaa Cafiiska Baabuurta iyada oo la wato waraaqaha cadaynya naafonimada. Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah, u wac (614) 752-7800.

Sharciga Mas'uuliyadaha Lacageed

Qofna ma wadi karo baabuur iyo wax la midka ah iyada oon la haysan caddayn caymis. Si loo raaco sharciga, huwanaanta xil-saarnida caymis oo ah $12,500-$25,000 oo loogu talagaly dhaawaca qofka ama dhimashada iyo $7,500 oo ah burburka milkiyadda ayaa loo baahan yahay.

Shilka Mootada Warbixin (BMV 3303)

Marka aad gasho shil keena dhaawacyo ama wax ka badan burbur ah $400, oo qolada kale ay yihiin blaa caymis, waxaad fayl garayn kartaa warbixinta shilka mootada gudaheeda lix bilood lga bilaabo maalinta shilka. Foomamkan ayaa laga heli karaa internetka halkan http://www.bmv.ohio.gov/bmv_forms.stm, sharci fulinta, hay'addaada caymis ama BMV. Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah, u wac (614) 752-7500.

E✓Check Certificate

Barnaamijka Baarista iyo Dayac-tirka Baabuurta waa barnaamij lagu baaritaan hawo qashin-xakamayn ah oo loogu tala-galay sidii tayada hawada kor loogu qaadi lahaa kaawntiyada qaarood ee Ohio. Kaan-wntiyadani waa:

Cuyahoga

Geauga

Lake

Lorain

Medina

Portage

Summit

Shahaadada E✓Check laga yaaba in loo baahdo ka hor intaan mootada laga diiwaan-galin kaawntiyadan. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka1-800-CAR-TEST.

Dukaammada Mar-Istagga ah

Hay'adaha liisanka qaarkood ayaa loo yaqaan dukaammada mar-istagga ah oo waraaqaha lahaanshaha iyo adeegyada rugta imtixaanka laga bixiyo ama agteeda gagaaraha hay'adda liisanka.

Goobaha Mar-listagga ah:

Kaawnti	Magaalo
Ashtabula	Jefferson
Athens	Athens
Auglaize	Wapakoneta
Champaign	Urbana
Clinton	Wilmington
Crawford	Bucyrus
Cuyahoga	Mayfield Heights
Cuyahoga	Parma
Darke	Greenville
Delaware	Delaware
Franklin	Columbus
Fulton	Wauseon
Gallia	Gallipolis
Greene	Xenia
Guernsey	Cambridge
Harrison	Cadiz
Huron	Norwalk
Jackson	Jackson
Knox	Mt. Vernon
Lake	Painesvillle
Licking	Newark
Logan	Bellefontaine
Lorain	Elyria
Lucas	Toledo (Heatherdowns)
Madison	London
Marion	Marion
Medina	Medina
Mercer	Celina
Miami	Troy
Montgomery	Huber Heights
Pickaway	Circleville
Portage	Ravenna
Preble	Eaton
Ross	Chillicothe
Sandusky	Fremont
Shelby	Sidney
Vinton	McArthur
Washington	Marietta
Williams	Bryan
Wood	Bowling Green

Haka Iman Guriga Adiga oon Haysan Sheydan!

- Shahaadadaaada lahaanshaha baabuur ee orijinaalka ahayd
- Laba wakiilasho sharci oo hantiile uu siiyay haddii laba qof ay wadaagaaan lahaanshaha laakiin qof kaliya ahi u howsha qabanayo
- Heshiiska deynta ee baabuurkaaga (haddii deyn lagaaga leeyahay)
- Hal aqoonsi sawir leh (liisankaaga waditaan ee hadda aad leedahay) iyo aqoonsi kale oo ku leh dusheeda lambarkaaga Sooshal Sekuuriti
- Caddayn waxbarasho waditaan (haddii aad ka yartahay 18 jir)
- Qof la saxiixa wadayaasha ka yar 18 jir (la saxiixu wuxuu u baahan yahay caddayn hore ama labaad haddii uuna haysan Ohio DI ama Aqoonsi jirin)
- Caddayn ah magacaaga sharciga ah oo buuxa, Lambarka Sooshal Sekuuritiga (SSN), Cinwaan Jid Ohio iyo sharciga joogitaanka Mareykanka. Haddii aad u baahato fasax ku meel-gaar ah (haddii labaduba ayna jirin, horay ugu garaac si aad u garato liiska dukumentiyada la aqabali karo) ama fiiri bortayada shabakade ee ku taal www.OhioBMV.com.

Haddaba imkaad si rasmi ah u tahay babuur wade reer Ohio!

Ku soo dhowow Ohio si badbaado lehu wad oo suunka xiro!

Ohio Department of Public Safety
P. O. Box 182081
Columbus, OH 43218-2081

OHIO BMV
BUREAU OF MOTOR VEHICLES

OHIO DEPARTMENT OF PUBLIC SAFETY
EDUCATION · SERVICE · PROTECTION

WWW.PUBLICSAFETY.OHIO.GOV

BMV 3743 9/10